Xeerarka Rakaabka

- Fadlan sii dhammaan tafaasiisha socdaalka kala-diraha gaadiidka(dispatcher) marka aad isdiiwaangalinayso (tusaale ahaan, xayawaanka adeega, wehelka, kaalmada loo baahan yahay, iwm.). Codsiyada u diyaarinta qaabka macquulka waa in la sameeyaa wakhtiga balanta raacitaanka la dhiganayo
- Darawaliintu kuma samayn karaan isbeddello raacitaanka muddaysan haddii aan laga soo xaqiijin xafiiska kala-dirista gaadiidka
- Diyaar u noqo marka baskaagu yimaado oo keen nooliga saxda ah (ama lacagta) marka aad raacayso baska
- Cuntada iyo cabitaanka furan lama oggola baska
- Shaadhadhka iyo kabaha in la xirto ayaa loo baahan yahay
- Dhammaan rakaabka ***WAA INAY*** xirtaan suunka kursiga oo ay iska sii fadhiyaan ilaa basku si buuxda isku taago
- Dhamaan xayawaanka waa inay ku jiraan xero marka laga reebo hadii ay yihiin xayawaanka adeega
- In sigaar lagu cabbo, lagu dagaalamo ama wax la tuurtuuro lama oggola
- Isticmaalka khamriga waa ka mamnuuca baska
- Qoryaha iyo hubku waa ka mamnuuc baska
- Dareerayaasha ololi og ama beytariyada gaadiidka looma oggola baska
- Rakaabku isaga ayaa ka masuul ah alaabtiisa gaarka ah mar kasta. Baakadaha iyo alaabta kale ma xannibi karaan marinada ama kuraasta. Haddii alaabtu badan tahay ama wayn tahay, rakaabku wuxuu u baahan karaa inuu diyaarsado siyaabo kale oo loogu qaado alaabta. Tri-CAP masuul KAMA aha alaabta looga tago baska
- Waligaa ha faragelin hawlaha baska
- Ixtiraam darawalada iyo rakaabka kale.
- Hadalka iyo habdhaqanka loo fasiran karo dambi ama handadaad waa mamnuuc waxayna keeni karaan joojinta adeegyada. Tri-CAP *Transportation* wuxuu xaq u leeyahay inuu diido qaadista cid katsa oo ku dhaqmi waaya heerarka adeegyadan.

Hawlgalka Tri-CAP:

Hawgalka Tri-Cap waa in la ballaariyo fursadaha loogu talogalay fayo-qabka dhaqaalaha iyo bulshada ee degganayaasha iyo horumarinta bulshooyinkeena.

Barnaamijyada kale ee lagu bixiyo Tri-CAP

- Kaalmada Guriyeynta
- Kaalmada Tamarta
- Barnaamijka Gargaarka Nafaqada Dheeraadka ah (SNAP)
- Aqoonta Dhaqaalaha
- Kiraysiga 101
- Kaalmada Canshuurta
- Dib u dhiska Nolosha
- Hantida Qoyska ee Xorriyada ee Minnesota (FAIM)

Faallooyinka & Cabashooyinka Rakaabka

Faallooyinka iyo cabashooyinka waxaa laga diiwaangelin karaa Agaasimaha Gaadiidka iyadoo la wacayo deegaanka 320-251-1612, taleefanka lacag la'aanta ah 888-765-5597, ama in qoraal ahaan loogu gudbinayo
Agaasimaha Tri-CAP Transist,
PO Box 683, Waite Park, MN 56387-0683.
Waxaa kale oo aad nagala soo xiriiri kartaa
general@tricap.org

Qofna looma diidi karo inuu raaco iyadoo lagu salaynayo isir, midab, waddanka qofku ka soojeedo, diin, jinsi, naafonimo jireed ama maskaxeed, xaaladda guurka, xiriirka siyaasadeed, xaaladda kaalmada dadwaynaha, doorashada jinsiga ama xaalad milatari.

Tri-CAP
TRI-COUNTY ACTION PROGRAM
Helping People. Changing Lives.

Gaadiidka Tilmaamaha Rakaabka

Tri-CAP Transit Connection waa barnaamij **gaadiid** bas dadweyne oo ay ka go'an tahay inuu bixiyo adeeg gaadiid oo ammaan ah, lagu kalsoon yahay, raqiis ah daacadna ah

(320) 251-1612
(888) 765-5597
www.tricap.org

Warbixinta Guud

Tri-CAP Transportation waa adeeg gaadiid dadweyne oo u fidiya adeeg bas dadweynaha guud iyada oo aan la eegin da'da, dakhliga, ama shuruudaha mutaysiga. Basaska Tri-CAP waxaa lagu qalabeeyay wiishash si loogu gargaaro kursi-curyaanada, mootooyinka iyo dhaqdhaqaaqa.

Tri-CAP Transportation waxay siisaa adeeg cidhif ilaa cidhif ah dhammaan dadka isticmaala adeegyadayada Rakaabu waa inay keenaan wehelkooda ama shaqaalaha gaarka ah haddii heerkan adeegga loo baahan yahay Raacista baska waxa laga yaabaa in la isa sii diiwaangaliyo ilaa laba toddobaad kahor. Isdiiwaangalinta xilliga hore ayaa lagu taliyaa maadaama dhammaan raacitaanada lagu bixiyo in qofkii soo horreeya marka hore ahmiyadda la siiyo. Marka ay suurogal tahay, waxaanu ku qaadi doonaa raacitaanada isla maalinta diiwaangalinta ah, lacag dheeraad ah.

Dhammaan codsiyada adeegga baska waa in la sameeyaa iyada oo la wacayo xarunta Kala-Dirista Gaadiidka Tri-CAP. Raacitaanka burintiisa waa in la sameeyaa 24 saacadood kahor mar kasta oo ay suurogal tahay. Iyada oo ay go'aanka leeyihiin shaqaalaha xafiiska Tri-CAP, **burinaha wixii kayar 24 saacadood waxa lagu qeexi karaa inay yihiin ballamo laga baaqday kuwaas oo keeni kara digniin. Tri-CAP wuxuu leeyahay xaqa inuu hakiyo adeegga kadib 3 baaqasho.**

Maalmaha Adeeggu Aanu Jirin

Xafiisku wuu xiran yahay mana jiro adeegga basku Maalinta Sanadka Cusub, Maalinta Madaxweynayaasha, Maalinta Xusuusta, Luulyo 4, Maalinta Shaqaalaha, Khamiis & Jimcaha Mahadcelinta, Maalinta Kirismaska Ka Horraysa & Maalinta Kirismaska

Ka hubso bogeena internetka xiritaanada cusub iyo macluumaadka dariiqa

Xiritaanada Cimilada ama Xaaladaha Degdegg ah Waxaa Laga Baahiyaa sanduuqa codka xafiiska iyo sidoo kale raadiyayaasha soo socda:
WJON AM 1240 iyo WWJO FM 98.1 gudaha St. Cloud, KASM AM 1150 iyo KDDG FM 105.5 gudaha Albany iyo KLTF AM 960 iyo KFML FM 94.1 gudaha Little Falls

Nooliyada

Nooliga saxda ah ayaa loo baahan yahay marka la raacayo. Darawaliintu ma samayn karaan lacag sarifid.

- Socdaalada gudaha magaaladu waa $1.25 halkii raacitaan
- Socdaalada miyigu waa $3.00 halkii raacitaan
- Ilaa laba carruur ah oo da'doodu tahay 5 iyo kayar ayaa laga yaabaa inay ku raacaan bilaash markii ay la socdaan qof wayn isagu nooliga bixiyey
- Ilaa laba carruur oo dheeraad ah, oo ah da'da 5 iyo kayar, waxay ku raaci karaan ½ nooliga caadiga ah marka uu la socdo qof wayn oo isagu nooli bixiyey
- Nooliga isdiiwaangalinta iyo raacitaanku isku maalinta yihiin wuxuu leeyahay .75 senti halkii socdaal
- Qiimayaasha waa la beddeli karaa
- Dariiqyada miyiga ee weecashada ah ma shaqeeyaan haddii rakaabku ka yar yahay 5

Waxa Aad Filan Karto

- Darawalo, iyo Kala-Dirayaal fiican oo daacad ah
- Shaqaalaha Tri-CAP Transportation waxay u hoggaansamaan dhammaan shuruucda federaalka, gobolka iyo deegaanka
- Waxaanu joogtaynaa goob shaqo oo ka madhan daroogo iyo khamri
- Darawaladu waxay bixin doonaan kaalmo aasaasiga ah marka loo baahdo si ay rakaabku si ammaan ah ugu soo galaan ugana baxaan baska
- Gaadiidku wuxuu noqon doonaa mid nadiif ah oo bixiya jawi ammaan ah
- Dhammaan darawalada basasku waxay haystaan shahaadada CDL waxayna raacaan xeerarka iyo shuruucda wadista Minnesota
- Darawalada basaska waxaa lagu tabobaraa gargaarka degdegga ah ee aasaasiga ah
- Darawalada basaska waxaa lagu tabobaraa ku shaqaynta wiisha iyo si sax ah u xidhista aaladaha dhaqaaqa

Xarunta Kala-Dirista

Isniin-Jimce, 6:00 subaxnimo ilaa 6:00 galabnimo
Sabti 8:00 subaxnimo ilaa 5:00 galabnimo
320-251-1612 ama -888-765-5597

Farriimaha waxa lagu dhaafi karaa sanduuqayaga codka kadib saacadaha shaqada iyo ciidaha. Fariimaha waxa la eegaa maalmaha shaqada ee caadiga ah ee dambe.

Si Aad U Balansato Raacitaan

- Wac Xarunta Kala-Dirista Tri-CAP
- Rakaabka ay markii u horraysay tahay waxa la waydiin magaca, cinwaanka guriga, lambarka taleefanka, cidda lala xidhiidhayo xaaladda degdegga ah iyo taariikhda dhalashada
- Sii kala-diraha macluumaadka socdaalka oo faahfaahsan oo ay kujiraan magaca, taariikhda, wakhtiga socdaalka loo baahan yahay, meesha lagaa qaadayo iyo meesha lagu gaynayo
- Waxaa lagu taliyaa in la siiyo **ugu yaraan 30 daqiiqo wakhiga safarka** soo qaadista ilaa imaanshaha goobta ballamaha wakhtiga loogu talogalay.
- Aqoonso wax kamid/dhammaan rakaabka kula socdaalaya (wehelka ama kaaliyuhu waa bilaash)
- Waxaad siisaa macluumaad kasta oo kusaabsan kaalmada loo baahan karo (tusaale ahaan: xayawaanka adeega, wehelka, kaalmada loo baahan yahay iwm.). Codsiyada waafajinta macquulka ah waa in la sameeyaa marka diiwaangalinta
- Haddii aad ogtahay muddada aad joogaysid meesha aad ku socotid, kala-diruhu wuxuu kaa caawin doonaa jadwalkaaga soo noqoshada
- Bixi wixii macluumaad shakhsiyadeed ee cusub (isbeddelka lambarka taleefanka, baahiyaha dhaqdhaqaaqa, iwm.)
- Haddii aad qorshaynayso joogsiyo badan sii kala-diraha macluumaadkaas wakhtiga isdiiwaangalinta
- Kala-diruhu wuxuu isku dayi doonaa inuu waafajiyo wakhtiga qaadista ee aad doonayso jadwalka markaas jira. Kala-diruhu wuxuu soojeedin doonaa wakhti kala oo lagu qaado haddii codsigaaga aan la fulin karin. Baska Tri-CAP wuu iman karaa **10 daqiiqo** kahor ama kadib wakhtiga qaadista la muddeeyey.

Dhammaan jadwallada waa la beddeli karaa